



**War Saxafadeed:** Baaq ku aadan Dagaalka Gaalkacayo

**Ref: PDF/011130**

[www.puntlanddiaspora.org](http://www.puntlanddiaspora.org)

**Date: Sept 2<sup>nd</sup>, 2011**

[mediarelations@puntlanddiaspora.org](mailto:mediarelations@puntlanddiaspora.org)

---

Waxaa ururka PDF uu aad uga xunyahay dhiigga dadka walaalaha ah ee ku daatay dagaalkii labada maalmood socday ee ka dhacay xaafado ka mid ah Magaalada Madaxda Gobolka Mudug ee Gaalkacayo. Wuxaan tacsi u diraynaa dhamaan etheladii iyo qaraabadii dadka kaga geeriyyoday dhacdadaasi anagoo u rajaynayna samir iyo iimaan inuu llaahay ka siiyo.

Waxaan dhamaan shacabka walaalaha ah ee reer Puntland xusuusinaynaa muhiimada ay leedahay nabadu, taas oo halbowle u ah sidii loo heli lahaa wadajir iyo wadanoolaansho dhab ah.

Sidaa awgeed, waxaan ku baaqaynaa:

- In sida ugu dhaqsaha badan loo joojiyo xabadda, lagana waantoobo hurinta colaadda iyo hub urursiga labada dhinac, loona turayo shacabka maatada ah.
- In guddi dhedhexaad ah oo leh Isimmo, culimmo, indhagarad iyo aqoonyahan loo saaro si ay ugu kuurgalaan, u xakameeyaan una soo afjaraan colaadan iyada ah.
- In sugidda amniga iyo nabadda magaaladda laga wada shaqeeyo, laguna taageero hay'addaha amniga sidii ay waajibkooda u gudan lahaayeen.
- In aan la ilaawin in reer Puntland ay wada yihiin hal qoys oo isku ab iyo isir ah, sidaa awgeed ay waajib tahay qadarinta iyo xurmaynta wada dhalasho.
- In la iska dhowro lagana wada hortago in dhacdadaan ay ka faa'iidaystay kooxaha iyo ashqaasta nabaddiidka ah kuwaas oo ka soo horjeeda nabad iyo xasilooni ka dhalata Mudug iyo Puntlandba.

Waxaan ugu dambayntii ururka PDF ku baaqayaa in hab wadatashi iyo wadajir ah xal waara looga gaaro ka hortaga dilalka qorshaysan, amni darada, colaadda iyo aamin darada ku dhex jirta bulashada Gobolka Mudug.

Waxaan mar labaad llaahay uga baryaynaa intii ku dhimatay dagaalkaasi inuu u naxariisto, inta ku waxyeelowda degdeg u bogsoodaan.